This page was exported from - Laashin Iyo Hal abuur
Export date: Wed Feb 21 1:32:15 2018 / +0000 GMT

GABAYGA: SOOYAAL Q/4AAD Curiye: Abwaan Maxamad Xuseen Faarax

GABAYGA: SOOYAAL QAYBTII 4AAD SANADGUURO Gabaygan SOOYAAL, waxaan tiriyey; **28-8-2014.** Waa gabay aan tiriyo kii ugu dheeraa waana (500) oo bayd, waxaana sababay, inuu dheerado gabayg, wuxuu ka hadlayaa sooyaalkii Soomaaliyeed. Gabaygu wuxuu ka kooban yahay shan qaybood oo isku xiran, sidaas daraaddeed, waxaan u u sameeyey tusmadan ah; **Q1AAD; SOOYAAL**; waxay ka hadleysaa soolaalidii hore iyo Soomaalida hadda farqiga u dhexeeya dhaqan ahaan. Ka la soco, baydadka (51) illaa (147), waxaana ka horreeya horudhaca ito ararta gabayga.**Q2AAD; SIRIQROOR**: waxay ka hadleysaa siyaasadda Soomaaliya in aysan xoroobin 1960 illaa hadda. Kala soco baydadka (148) illaa (283)**Q3AAD; SEEGSEEG**: waxay ka hadleysaa guubaabin shacabka Soomaaliyeed. Ka la soco baydadka (284) illaa (338)**Q4AAD; SANADGUURO**; waxay ka hadleysaa, 1-waxay ka hadleysaa xornimada la sheego in 1960kii la qaatay 2- shanta Soomaaliya ee la sheego in ay beentahay 3- 26da june iyo 1da luulyo ee loo dabbaaldego waxa ay tahay. Ka la soco baydadka (339) illaa (427)**Q5AAD; SAFGALAAL**; waxay ka hadleysaa dhibaatada qabyaaladdu ay leedahay. Ka la soco baydadka (428) illaa (503) marka k bogasho wacan. **QAYBTII 4AAD SANADGUURO** Afartaa intaan sadarra dhigay, siin ma ka hikaadshey 340. Sa'dii aan ka qaadiyo miyaan surinki weydaarshey 341. Ma u simay sidii sayma roob, oo salaad da'aya 342. Ma saldheeyey baydgaabku waa, sarin habaabaaye 343. Afar kalena aan kuu sawiro, waa silsilad dheere. Bulshayahay sifada Aadmi waa, boqol siyaaboode 345. Qof kastana sibuu doonayaa, ama saluugaaye 346. Waxse aniga saabkayga yaal, baan sadaqayaaye 347. Xalay seexan waayoo hurdada, waan salaalugaye(55) 348. Sakaraad sidaan ahay ayaan, saamallayl kacaye 349. Hadba sinu fariistoo subxiga, galay salaaddiiye 350. Wixii aan la selaloo in badan, soor la cuni waayey 351. Oo sirinsirkaas iigu wacan, maydin solonsiiyo 352. Nin walaalki cadaw soo jireen, haysto sabarkiisa 353. Oo weli sabgaalinahayoo(56), uu sindabyeeyey 354. Isagana sabaansabid maskixi, lagu samaynaayo 355. Maqaar saarna lagu saatanshiyo, saawirro adeega 356. Oo seegto laga dhaadhacshiyo, sheekan soconaynin 357. Oo saabbesaabbe iyo ku nool, siibado qaxooti 358. Xornimaduu salleelaynayiyo, calankan uu saartay 359. Lixiyo labatankuu siiyay juun, ee kowda luul saxayo 360. Sanadguuradan maanan garan, aay sabcinayaane 361. Siduu yiri kurraacaha kufriga, qaatay salawgiisa 362. Bal su'aala Soomaaliyeey, weertan soo socota. Haddii uu shan soomalo ka dhigay, sayncaddaha gaalku 364. Seddax maqanya, labo seedo mudan, oo silsiladaysan 365. Oo seeska wadareed u siman, magaca soomaali 366. Sareedada xorriyo ee lahelay, saani ugu qayb dheh 367. Bal suureey sinnaan iyo badnaan, saamigii dhaxalka 368. Ma saxbaa in loo saariyaa, suud iyo waqooyi 369. Intii kalena Sawaaxiliga iyo Xabashi aan siinno?. Su'aal kale haddii aan hordhigo, gebigeed soomaali 371. Subax baan midoownaan maqlaa, saacad iyo goore 372. Soomaali waataan ahayn, siman walaalaaye 373. Goormaanu ka la soocannoo, saafmay dhaladkeennu? 374. Horta yaa sideedaba innaga, jeer na ka la saaray? 375. Sahnuuniga kufrigu sheekaduu, soo sabbaxateeyey 376. Siriqduu lugaha noo gelshiyo, dabinkuu noo soohday 377. Surka miyaan ku sidannaa xargihii, sida sabayn daylo?Suudda koofur, waqooyiga Sanaag, gobaladdaa Saylac 379. Sabiixdaa Jabuutiyo galbeed, Harar safkuu raacshey 380. Seerahaas Wajeer iyo sintaas, Gaarisada saaran 381. Shantii soomaloo soon gumaysi, noo sohdimo qaybshay 382. Sarintiyo sudmadahuu dhigiyo, surimmaduu jeexay 383. Miyaan weli ku sii socod lunnaa, tubihii seylaani?Siinka alif ardaga seero qalad, siyo kale u qaata 385. Salbanii Israa'iila ma saxo, suuraddii baqara 386. Nin sahwiyey, salaadaha ku noqoy, labo sujuudoode 387. Lixdankii haddaan seegnay talo, sibiqna duuflaalnay 388. Wax sawaaban oo silan haddaan, sahal ku taageernay 389. Salfudayd haddii aan u sacbinnay, sababti mowdkeenna 390. Suluxyadii qiyaaniyo waxaan, belo sawaafraacnay 391. Boqol sano inaan weli la sixin, qaladkan seeraaran 392. Oo aan sirtii abid la garan, waa sabcaalnimo'e(57) 393. Sow ma eegto illaa sebenudiin, dhagartan Soomaali?.Ina seenyo oo sayle aar, mici suryeeynaayo 395. Oo soorka dhuug sayn ilaa, sararta laallaado 396. Oo caato sabar wiiqanoo, awrba weli saarsan 397. Waa sidig irmaan kii na yiri, waana saabilaye 398. Gaawe sahashadeenii haddii, aan hungow saxannay 399. Inuu weli sedkeed yahay maxaan, Suub u garan waynay?.Soddon iyo sagaal sano siddeed, saa'id iyo naaqis 401. Soofdaran habaw bay ahayd, sidigta maandeeqe 402. Sallid(58) baana ku soohnaa waqeed, geedo saajiya'e 403. Sulsuldabar markii lagu eryee, saynta laga duubay 404. San ku xuuble dhiciskiina ay, sayrid miridhaysay(59) 405. Suulgoroyo(60) waatay toleen, saaqdhagooluhuye 406. Gujo suxulna ay ugu dareen, sacab ku maalkiiye 407. Markay gaagax dhega soolidee, iba salaax diidday 408. Afarteedii suul baa qabiil, saab ku qaaybsadaye. Nin sarteeda raba oon u socon, Seenyo dhaqankeeda 410. Oo inuu safriyo doonayiyo, saylad inuu beecsho 411. Oo sandareerto siisanahayiyo,

subax waxuu quuto 412. Iyo kii samaan iyo la raba, nabad inay soofto 413. Oo u sahanshay kayn seerbaxdoo, sarinku doogaabay 414. Oo sabo wanaagliyo u wada, seel inay mirato 415. Oo dhiillo saabliyo sibraar, soo sahsahanaaya 416. Oo jecel salaaxsuga inuu, sebiyaduu maalo 417. Labadaas ayaa ka la safane, maan gar ka la siinno?. Hadal la ma surnaadee haddaan, soo afxiro weerta 419. Sa'da ka ma dambaystaa waxaan, doodda kaga seexday 420. Sacsac bahala, suqurjaa(61) horkaca, suququl(62) taageera 421. Sanfi(63) dhaqan xun, soofaalli(64) tuug, saaxiriin quruna 422. Iyo saar gumaystaha intaad, daba saqlaynnayso 423. Sedbursiga intay sheegayan, si xun u faa'iidku 424. Suud iyo waqooyiga intii, lagu sargooynaayo 425. Midnimaad saleelo u heshiyo, samo inaad waarto 426. Suxulkaaga leef weeye iyo, sacab timooleeye 427. Hana sugina soomaaliyeey, nabad sawaabkeede! Eray bixin; sabgaalin: wax nool oo dhulka la la dhaco iyado la dilayo. 57. sabcaalnimo: sawirnimo. 58. sallid: qofka mar walba ku dhiba oo aan kaa tegeyn. 59. miridheyn: hasha dhicisa ama ilmuhu ka xumaadaan. 60. suulgorayo: hasha la gacanbarayo suulka kor u xirid. 61. suqurjaa: qofka damaca xun. 62. suququl: qofka yabaalka badan. 63. sanfi: dabbaal. 64. soofaalli: qofka iska hadla, si xishooddarra ah. La socda qaybta xigta ee gabayga.**Curiye: Abwaan Maxamad Xuseen Faarax**